

# Maaree biilashaaada laydhka iyo biyaha

## Caawimada biilasha laydhka iyo biyaha

Shirkadaha laydhka iyo biyaha ayaa ka caawin kara macaamiisha biilasha laydhka iyo biyaha haddii ay u qalmaan caawimaad. La xidhiidh adeegaaga faah faahin dheeraad ah.

## Badbaadso Tamarta, Badbaadi Lacagta

Haddii aad waqti badan ku qaadatid guriga, waxaad sidoo kale kordhinaysaa adeegsigaaga laydhka iyo biyaha. Qaad talaabooyin fudud sida deminta nalalka, adoo isticmaalaya xadhko koronto, lingixida tuubooyinka liigaya ama daaqadaha, iyo hagaajinta heerkulbeega si aad u kaydiso tamar badan.

## Ku xidhnow waxyaabaha kuu muhiimka ah adoo isticmaalaya telefoon iyo adeega shirkada alaabta badan iibisa

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta taleefanka ama adeegyada internet-ka, kala xidhiidh shirkadaada taleefanka ama shirkad bilaa waayar ah oo ku saabsan waxyaabo muhiim ah, oo ah barnaamij ay dowladda federaalku maalgaliso oo qiimo jaban ku siinaya adeegga taleefanka shaqsiyaadka dakhligoodu hooseeyo. Macaamiisha adeegyada muhiimka ah waxay ku dabaqi karaan faa'iidadooda adeega guriga ama taleefanka gacanta ama xawaaraha sare. Si aad u hesho macluumaad dheeri ah booqo [www.lifelinesupport.org](http://www.lifelinesupport.org) (mareegta waa English [oo keliya, dalabka waxaa lagu heli karaa Spanish](#)).

## Hada Caawimo Hel

Waxaan halkaan u joognaa inaan kaa caawino su'aalahaaga, waxyaabaha aad ka welwelsan tahay, iyo cabashooyinka shirkadda laga bilaabo 8 subaxnimo - 5 p.m. Isniinta ilaa Jimcaha taleefanka 1-888-333-WUTC (9882), adigoo toos ugu wada sheekaysanaya bartayada internetka, ama email ahaan [consumer@utc.wa.gov](mailto:consumer@utc.wa.gov). Booqo bartayada internetka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, foomamka cabashada, tabaha keydinta tamarta, iyo cusbooneysiinta COVID-19 ee muhiimka ah.

Ma u baahan tahay macluumaadkan qaab ka duwan? Wac 1-800-833-6384 ama garaac 711 wixii ku saabsan Qoraalka Teletypewriter-ka (TTY) adoo adeegsanaya Adeegyada Relay Washington.

UTC ayaa kaa caawin kara luqado badan. Fadlan soo wac 1-888-333-9882 adoo weydiinaya turjubaan.